

# Arterial Switch Operation

Qalliinka Kala-beddelka Xididdada Qeybta Kore




© 2012 The Children's Heart Clinic

**Wadne Caadi ah**



Ogeysiis:


The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404




© 2012 The Children's Heart Clinic

**Qalliinka Kala-beddelka Xididdada Qeybta Kore ama ASO**
Arterial Switch Operation (ASO)

Arterial Switch Operation (Qalliinka Kala-beddelka Xididdada Qeybta Kore ama ASO) waxa loo sameeyo waa in lagu saxo transposition of the great arteries (halbowleyaal is weydaartay ama TGA) oo ay weheliso ama aysan wehelin ventricular septal defect (cilladda duleelka qalbaca hoose ama VSD) (eeg TGA). Qalliinkan waxaa badanaa la sameeyaa toddobaadka ugu horreeya ee dhalashada ilmaha.

Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Waxaa dhallaanka lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). Patent ductus arteriosus (Xididka dheeraadka ah ama PDA) waa la xirayaa oo la kala jarayaa. Waxaa la kala qeybinayaa halbowlaha weyn iyo halbowlaha sambabka. Habka loo qalo wadnaha ilmaha ayaa la raacayaa, oo horay ayaa la keenayaa halbowlaha sambabada, ama dhanka hore, ee halbowlaha weyn. Markaas halbowlaha weyn ayaa lagu tolayaa qeybta hoose ee halbowlaha sambabka (hadda "qeybta cusub" ee hoose). Halbowleyaasha wadnaha ee midig iyo bidix waa lagu soo saarayaa "batoonka" qeybta xididkii hore ee qeybta hoose. Batoonka halbowlaha wadnaha waxaa lagu tolayaa kan ah "qeybta cusub" ee la sameeyey. Qeyb ka mid ah xuuba wadnaha ee ilmaha (kiish ku wareegsan wadnaha) ayaa lagu hagaajinaa qeybtii hoore ee halbowlihii hore (hadda waa in qeybta hoose tahay "sambab cusub") marka laga saaro batoonka halbowlaha wadnaha laga saaray. Halbowleyaasha sambabka ayaa markaa dib loogu xirayaa xididka "sambabka cusub", oo wuxuu buuxinaya qeybtii beddelka halbowlaha ee qalliinka. Atrial septal defect (cillad duleelka wadnaha ama ASD) iyo ventricular septal defect (cilladda duleelka qalbaca hoose ama VSD), haddii ay jiraan, waa la hagaajinayaa (eeg dayactirka ASD & dayactirka VSD). Marmar, qalliinka xabadka waa uu sii fur-naanayaa oo meeshii la jeexay waxaa lagu daboolayaa in yar oo ah Gore-tex® (Gore) ama xabag. Xabadka waxaa markaa loo xirayaa sida caadiga ah hal ama laba maalmood ka dib.

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 4 ilaa 5 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Waxaa ilmaha badankooda lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada ama IV daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe ama IV bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, kateetaraha Foley oo ah kan kaadidu geleyso, iyo xargaha batariga wadnaha oo meelgaar ah.
- Sookabashada Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib: Waxaa wax caadi ah inay dhallaanku xoogaa "bararaan" ka dib qalitaanka badan ee adag. Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saaraa maalmaha ugu horreeya ee qalliinka ka dib, balse waa inuu ku dhawaado heerkii culeyska iyo dareeraha ee qalliinka ka hor. Tuubada halbowlaha badanaaa waa la gooyaa marka la baxiyo tuubada neefsashada oo inta badan daawooyinka faleebbaha waa la joojinayo. Tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn in mar dambe a isticmaalo. Tuubooyinka xabadka waxaa laga bixinayaa marka dheecaanku yaraado ee xabadka loo xiro.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 10 ilaa 14 maalmood ka dib marka loo geliyo ASO. Wakhtiga joogitaanka waxay ku xiran tahay ilaa inta dhallaanku baranayo in uu wax cuno. Waxa ay ilmuhu joogaan toddobaad ama ka badan si ay u bartaan cuntada qalliinka ka dib.

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib ASO sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin) looga hortago xinjirowga
- Dhimista culeyska si wadnaha looga yareeyo hawsha uu qabto (Enalapril, Captopril)


© 2012 The Children's Heart Clinic